

CUNTADA ILMAHA YAR EE GURIGA LAGU SAMEEYO HANAANKA CUNTO KARINTA

Khudaarta miraha ah oo karsan

Dhaq khudaarta miraha ah ee dareyga ah. Ku karkari wax yar oo biyo ah ilaa ay ka jilicdo. Cajiin ama ku miir shaandho ilaa inta buurbuurku uu ka baaba'ayo. Hubi in aanad ku reebin wax diir ah ama iniinyo ah. Khudaarta miraha ah ee ku jirta qasaca biyo ku dhaq si aad uga dhaqdo sonkorta ku jirta ama hadii lagu maceeyey dareraha macaan.

Moos bisil iyo Miraha Kale oo Darey ah Miraha

Mooska bislaadey waa midka ah jaalaha lehna dhibcaha yar yar ee cowlan. Wax yar ku burburi fargeetada. Khudaarta kale ee miraha ah iyadana waa la burburin karaa: bartiikha oo bisil, fursadka, khudaarta loo yaqaano (apricots), miro ah bahda tufaaxa oo dhuun dheer leh (Pears) iyo khudaar la dhaho (prunes).

Khudaarta Miraha ah ee Barafeysan

Barafeysan, khudaarta miraha ah een la maceynin waa laga dhalaalin karaa barafka, ka dibna la shiidi karaa iyadoo lagu daro biyo barafeysan ee ah cadadka yar yar.

Khudaarta Cagaaran oo Karsan

Kari, fixi, uumi bixi ama dub, ka dibna isku laaq oo burburi. Ku dar biyo si ay isku dhexgasho. Ha ku darin milix, sonkor ama saliid.

Hanaanka karinta Hilibka

Iskudar koobka nuskii oo ah hilib si yaryar loo jarjarey oo si fiican loo kariyey iyo 2 qaado oo ah caanaha ilmaha yaryar ama caanaha naaska, fuuqa wax lagu kariyo ee loo yaqaano (beef broth) ama biyo ka dibna isku laaq. (Hanaankani cunto karintu waxay aad ugu haboon tahay biyo diiran.)